

COVID-19 | Maatregelen | 09/10/2020

SOMALI | Vertaald uit het Nederlands

Talaabooyinka 9 oktoobar

Hordhac

Dawladdu waxay leedahay xeerar si ay fayraska Koronaha u joojiso. Xushmee xeerarka. Haddii aad sidaas yeesho xanuunku kugu dhici maayo qof kalena ku ridi maysid. Bilayska ayaa ku kantarooli kara.

Fiirof gaar ah: Magaalooyinka iyo degmooyinka qaarkood waxay leeyihiin xeerar dheeri ah. Hubi bogga internetka ee magaaladaada ama degmadaada.

6 xeerar oo dahabi ah

- Fiiro gaar ah u yeelo nadaafaddaada. Joog guriga markii aad jiran tahay. Marar badan gacmahaaga ku dhaq biyo iyo saabuun.
- Ka fogow ugu yaraan 1.5 mitir dadka kale.
- Fiiro dheeri ah u yeelo bukaanada (nugul) halista ku jira:
 - dadka da’doodu ka wayntahay 65 sano.
 - dadka wadnaha, sambabada ama kalyaha dhibaato ka haysato
 - dadka infekshanka degdeg u qaada.
- Sida fiican waa in aad dadka dibadda kula balanto.
- Xiriir kaaga dhaw ku xaddid ugu badnaan 3 qof. Dadka aad xiriirka dhaw la leedahay In aad 1.5 mitir kala fogaataan looma baahna.
- Dibadda dadkale ma u raacaysaa? Waxa la ogolyahay ugu badnaan 4 qof in aad ahaataan.

In magaalo kale ama dal kale la aado

- Beljamka gudahiisa:
 - Si xor ah ayaad ugu dhax safri kartaa.
 - Ma isticmaashaa gaadiidka dadweynaha (bas, taraam ama tareen)? Ma ka wayntahay 12 sano? Waa in aad xirato mar kaas maaskaro afka ama shaal aad ku daboosho afka iyo sanko. Taas waa waajib.
- Fasaxa dalka dibadda ka ah:
 - Waxaad u safri kartaa wadamo kale. Waxaa jira 3 nooc oo aagag ah.
 - ▶ Waxaad u safri kartaa aagagga cagaaran. Taasi waa amaan.
 - ▶ Waxa fiican inaad u safrin aagagga casaanka ama liimiga.
 - Ka fiiro bogga internetka ee Wasaaradda Arimaha Dibadda: diplomatie.belgium.be. Wadan kasta xeerar u gaar ah ayuu yeelan karaa. Xeerarka ka fiiro:

https://diplomatie.belgium.be/nl/Diensten/Op_reis_in_het_buitenland/reisadviezen

- Waa in aad foom (formulier) buuxisaa kahor intaadan ku soo noqon Beljemka. Waxaad ka haysaa foomka: <https://travel.info-coronavirus.be/nl/public-health-passenger-locator-form>
- Ma soo joogtay in ka badan 48 saac aagga guduudan/cas ? Waa qasab inaad xaqqiidii 3 dan shay samayso mar ka aad ku soo laabato Beljiemka:

- 1 Waa qasab in aad karantiil kasho.
- 2 Waxa aad buux-buuxinaysaa warqadan (formulier) <https://travel.info-coronavirus.be/nl/public-health-passenger-locator-form>. khatar sare ma ugu jirtaa koronaha ? waxa lagu siin doonaa koodh oo lagugu tijaabinayo.
- 3 Waa inaad guriga joogtaa ugu yaraan 7 maalmood. Kaliya banaanka u bax haddii aad dhab ahaan u baahan tahay. Tusaale ahaan: inaad tagto farmashiga, diktoorka ama supermarket. Xiro mar kasta maaskaro afka ah.

Shaqo

- Ku shaqee kuriga, haday suurto gal tahay.
- Ma ku qasbantahay in aad shaqo aaddo? Maamulahaagu waa in uu diyaariyaa in ay dadku kala fogaadaan masaafad dhan 1.5 mitir. Sidaas manoqon wayday ? Markaa waydiiso maamulahaaga maaskarada afka.
- Su'aalo ma qabtaa? Waxa macluumaad ku siindoonaa maamulahaaga.

Dukaammada

- Dhammaan dukaamadu way furan yihiin. Suuq ayaa jira.
- Dukaamada gudahooda iyo suuqa marka aad joogto xiro maaskaro afka. Taas Waa waajib.
- Dukaanka habeenkii shaqeeya waxa uu furan yahay ilaa 22 saac habeenkii.
- Waad aadi kartaa timo-jaraha ama goobaha qurxinta gaarka.
 - Ballan samayso.
 - Xiro maaskaro afka

Hoteellada, maqaaxiyaha iyo kafateeriyadaha

- Maqaaxiyaha waxay furan yihiin ilaa 1-da aroornimo (saqdhexe).
 - Waxa fiican in aad horay u sii balansato (boos u sii qabsato).
 - Waxa la ogolyahay in aad hal miis isla fariisataan ugu badnaan 10 qof.
 - Miiska aad fadhido ku ekoow in aad fadhidow.
 - Waa in maaskaro afka aad xirataa. Taas Waa waajib. Miis ma fadhidaa? Markaa lagaama rabo in maaskaro afka aad xirato.
 - Waxaad ku dhaafaysaa goobta macluumaadkaaga lagaaga soo xiriiri.
- Kafateeriyadaha waxay furanyihiin ila iyo 23 saac ee habeen-nimo.
 - Waxa fiican in aad horay u sii balansato (boos u sii qabsato).
 - Waxa la ogolyahay inaad hal miis isla fariisataan ugu badnaan 4 qof.
 - Miiska aad fadhido ku ekoow in aad fadhidow.

- Waa in maaskaro afka aad xirataa. Taas Waa waajib. Miis ma fadhidaa? Markaa lagaama rabo in maaskaro afka aad xirato.
- Waxaad ku dhaafaysaa goobta macluumaadkaaga lagaaga soo xiriiri.

Xiriirka bulshada

- Waxaad la kulmi kartaa cidda aad rabto. Mar kasta ilaali masafo dhan 1.5 mitir ah ama xiro maaskaro afka ah.
- Waxaad xiriir dhow la yeelan kartaa ugu badnaan 3 qof oo isla dadkaas ah. Masafo dhan 1.5 mitir markaa muhiim maahan. Caruurta ka yar 12 sano iyo dadka aad isla degantihin tirada kuma jiraan.
- Dad ma rabtaa inaad guriga ku casuunto ? Waxaad casuumi kartaa ugu badnaan 4 qof. Carruurta ka yar 12 sano tirada kuma jiraan.
- Banaanka dad ma isku raacaysaan ? Waxaad is raaci kartaa ugu badnaan 4 qof. Caruurta ka yar 12 sano tirada kuma jiraan.

Dhaqdhaqaaqa

- Ma ka tirsan tahay naadi isboorti? Markaas waxaad la jimicsan kartaa ugu badnaan 50 qof.
- Waxaad ku jimicsan kartaa goob jimicsi, naadi isboorti ama barkadaha dabbaasha.
- Waad aadi kartaa saunasada ama xarumaha fayodhowrka.

Waqtiyada firaaqada

- Waxkasta way furan yihiin, tusaale ahaan maktabadda, beeraha madadaalada (pretpark), jardiin lagu ciyaaro oo gudaha ah (binnenspeeltuinen) ama qamaarka (casino).
- Ma aadaysaa munaasabada sida rasmiga ah loo soo agaasimay (tusaale ahaan xaflad tuulo, tartan isboorti ama bandhig dhaqameed)? Waxa jirta ugu badnaan tiro go'an oo ka soo qaybgaleyaal ah.
 - ugu badnaan 200 oo qof gudaha, ugu badnaan 400 oo qof dibadda.
 - Urur kasta waxa uu leeyahay xeerar u gaar ah. Ka hubi boggooda internetka.
- Waa in aad xirato maaskaro afka. waa waajib marka aad joogto goobahan:
 - Dukaammada iyo xarumaha dukaammada,
 - Jidadka dukaammada,
 - Goobaha mashquulka ah,
 - Dhismooyinka dadweynaha,
 - Suuqyada,
 - Gaadiidka dadweynaha,
 - Maktabadaha,
 - Shaneemooyinka,
 - Matxafyada,
 - tiyaatarka, riwaayadaha, hoolalka-shirarka,
 - hoolalka-kulannada,
 - Carwada kermiska (de kermis),
 - Guryaha cibaadada.

- Waxaad siinaysaa macluumaadka lagaala soo xiriiro, haddii aad aaddo:
 - Xarumaha fayo-qabka (wellnesscentra),
 - Casharo isboorti ah aad naadi u aaddo,
 - Barkadaha dabaasha,
 - Goobaha khamaarka (casino's),
 - Hoollalka xafladaha iyo soo dhawaynta.

Maxaa wali aan la ogolayn ?

- Dhiskoteegyada iyo cawaysyada habeenkii (nachtclubs) wali ma furna.
- Dhacdooyinka waaweyn lama ogola.

Diinta

- Adeegyada diiniga waa la ogol yahay.
 - Waxa joogi kara ugu badnaan 200 oo qof.
 - Xiriir jirka ah lama ogola.
 - Waa in aad xirataa maaskaro afka. taas waa waajib.

Xanaanooyinka (Crèches) iyo Iskoolka

- Xanaanooyinka (crèches) way furan yihiin.
- Ardayda dhamaantood waxay aadi karaan iskoolka. Iskoolkaaga ayaa macluumaad dheeri ah oo la xiriira sanad dugsiyeedka cusub ku siin doona.

Dhiirigelin

Xeerarkan waxa ay muhiim u yihiin caafimaadka qof kasta. Qofkasta waxa laga rabaa in uu xushmeeyo.

Inaad sidaa yeesho waad ku mahadsantahay. Si wada jir ah ayaan fayraska Corona-ha u joojinaynaa.